

Janaayo 2025







Dhisida 120 guri oo guryo bulsho/dawlad ah lagana dhisayo Banksia Gardens ayaa meel fiican noo maraysa. Wiishashka saraha dhaadheer lagu dhiso ayaa la keeni doonaa goobta si ay u taageeraan hawlaha qaabdhismeedka.

Maxaa socda?

- Labo wiish ayaa la keeni doonaa goobta bilaha Janaayo iyo Febraayo 2025.
- Wiishashka waxaa lagu rakibi doonaa goobta dhexdeeda, marka wadooyinka xaafada wax saameyn ah kuma yeelan doonto inta wiishashka la rakibayo.
- Howlaha qaabdhismeedku waxay ka bilaaban doonaan goobta laga bilaabo Febraayo 2025, waxaana qeyb ka ah:
 - Shubka lagu shubayo tiirarka lagu taagayo dhismaha iyo sagxadaha.
 - Xoojinta biraha iyo darbiyada.
 - Darbiyada waxyaabaha la marinayo oo la diyaarinayo.

Waxa aad arki doonto aadna maqli doonto?

- Dhaqdhaqaaqa goobta oo sii kordhaya, taas oo ay ku jirto baabuurta waaweyn iyo mishiinada.
- Marba marka ka sii dambeysa oo ay howluhu meel fiican gaaraan waxaad arki doontaa qaab dhismeedka dhismaha oo si fiican usoo muuqan doona.
- Xoogaa boodh ah iyo buuqa mishiinada.
- Wiishashka waxaa loo isticmaali doonaa si waafaqsan xeerarka badbaadada iyo qaylada ee hawlaha dhismaha guryaha.
- Waxaa goobta ku sugnaan doona dad kala maareeya/haga baabuurta. Fadlan u hogaansan dhammaan calaamadaha/tilmaamaha badbaadada.
- Waxaan ku da'daali doonaa inaan yarayno wax kasta oo culeys keeni kara.

- | | | | |
|---|--|---|------------------------|
|  | Deyrka/siliga lagu wareejinayo goobta dhismaha |  | Xafiiska goobta |
|  | Ganjeeyaalka/Albaabada hore |  | Goobta wax laga rarayo |
|  | Aagga loogu talagalay in geedaha lagu ilaaliyo/beero |  | Goobta wiishka |

Mudada ay qaadanayso hawsha dhismaha



In la diyaariyo wiishka wax dhisa
Janaayo ilaa Febraayo 2025




Howlaha qaab dhismeedka
Laga bilaabo Febraayo 2025

Saacadaha shaqada

- Isniin ilaa Jimco 7.00 subaxnimo ilaa 6.00 galabnimo
- Sabti 7.00 subaxnimo ilaa 3.00 galabnimo (hadii loo baahdo)

Waxaan idinkaga mahadnaqaynaa dulqaadkiina inta aan wadno shaqooyinkan muhiimka ah.





Amniga goobta

- Qandaraaslayaashu waxay isticmaali doonaan qalab saaraya boodhka isla markaasna hoos u dhigaya shanqarta mashiinada, si ay u yareeyaan saamayntooda intii suurtoagal ah.
- Howlaha shaqada oo dhan waxay ka socon doonaan gudaha goobta dhismaha ee la ooday si dhow ayaana loola socon doonaa.
- Dhamaan shaqooyinku waxay u hoggaansami doonaan xeerarka WorkSafe Victoria iyo Maamulka Ilaalinta Deegaanka (Environmental Protection Authority - EPA) ee Victoria.

Su'aal ma qabtaa?

Wixii su'aalo ah ama aad ka walaacsan tahay ee ku saabsan howlaha dhismaha iimayl ugu soo dir kooxda banksia@lusimon.com.au.

Wixii macluumaad kale ah ee ku saabsan mashruuca iimayl noogu soo dir banksiagardens@homes.vic.gov.au.

Booqo websatkayaga oo isdiiwaangeli si aan kuula soo socodsiino wixii soo cusboonaado: homes.vic.gov.au/banksia-gardens-broadmeadows